# Xaashida Xaqiiqda

## MASRUUFKA CARRUURTA

Xaashidan Xaqiiqda waxay bixisaa macluumaadka guud ee ku saabsan masruufka carruurta ee waafaqsan *Xeerka Furriinka* Sidoo kale waxaad dooran kartaa inaad tixraacdo hagaha Waaxda Caddaalada ee loogu yeedho *Hagitaanada Masruufka Carruurta ee Federaalka: Tallaabo-Tallaabo*. Hagahan waxa uu bixiyaa 8 tallaabooyin oo fudud si uu kaaga caawiyo go'aan ka gaadhida masruufka carruurta

**Waa maxay masruufka carruurtu?**

"Masruufka Caruurta" waa lacagta hal waalid uu siiyo ka kale si u taageero carrurtooda dhaqaale ahaan ka dib kala maqnaanshaha ama furriinka.

**Miyay labbada waalid taageerayaan carruurtooda dhaqaale ahaan ka dib kala maqnaanshaha ama furiinka?**

Haa. Carruurtaadu waxay sharci ahaan xag uleeyihiin taageero dhaqaale oo ka timaada labbada waalid, oo labbadiinuba waa masuuliyad sharciyan idin saaran inaad bixisaan taageeradan. Kala maqnaanshaha ama furriinka ma beddelo waajibkaas joogtada ah.

**Bal ka waran haddii aanan ka doonayn masruufka carruurta waalidka kale?**

Masruufka carruurta waa xaqa ilmaha oo sharci ahaan ayay xaq u leeyihiin. Garsoorayaashu waxay diidaan bixinta furriinka haddii aanay ku qanacsanayn qaban qaabada macquulka ah ee loo sameeyay taageerada dhaqaale caruurtaada ee sii socota.

**Sideen u xisaabiyaa masruufka carruurta?**

Masruufka carruurta waxaa la xisaabiyaa iyaddoo la isticmaalayo hagitaanada masruufka carruurta. Hagitaanada masruufka carruurta waa sharciyo wada socda iyo jadwalo qadaro lacaga ah. Iyaga ayaa ah sharciga.

Waxaa jira *Hagitaanada Masruufka Carruurta ee Federaalka* (shuruucda waafaqsan *Xeerkan Furriinka*) iyo hagitaanada gobolka/dhulka (shuruucda waafaqsan sharciyada gobolka ama dhulka). Garashada kan la isticmaalayaa waxay ku xidhantahay xaalada:

- *Hagitaanada masruufka Caruurta Federaalka* (Hagitaanka Federaalka) waxaa lagu dabaqaa dhammaan dacwadaha furriinka ah, ilaa in waalidku ay ku noolyihiin

gobolka la magacaabay ee isku midka ah mooyee. New Brunswick, Manitoba iyo Quebec waa gobolada la magacaabay ee ku dabaqa hagitaanadooda marka labbada waalid ee is furrayaa ay halkaas ku nool yihiin.

- Hagitaanada gobolka iyo dhulka waxaa lagu dabaqaa marka waalidku aanay weligood is guursan iyo marka waalidka is qabaa ay kala maqnaanayaan laakiin aanay is furayn.

**Waa maxay faraqa u dhexeeya Hagitaanada Federaalka iyo hagitaanada gobolka/deegaanka?**

Dhammaan gobolada iyo deegaanka waxay leeyihiin hagitaanada masruufka carruurta kuwaas oo aad ugu eg Hagitaanada Federaalka, marka laga reebo Quebec taas oo leh masruufka carruurta nooc ayada u gaar ah. Sharciyada waxaa laga yaabaa inay ku kala duwanaan qaybo kamid ah garsoorka  laakiin dhammaantood, marka laga reebo Quebec, waxay isticmaalalaan jadwalada federaalka, markaas qadarada lacagtu aasaas ahaan waa isku mid.

**Haddii waalidka kale iyo anigu aan go'aan ka gaadhno qaban qaabada masruufka carruurta, ma waxaanu isticmaalaynaa hagitaanada khuseeya masruufka carruurta.**

Hagitaanada masruufka carruurta waa sharciyada dejinaya qadarada lacagta ee masruufka carruuta. Waalid ahaan, labbadiinaba waxaad go'aan ka gaadhi doontaan qadar kale oo masruufka carruurta ah —mid ka badan ama ka hoosaysa— ee u fiican adiga iyo ilmahaaga. Laakiin, haddii aad waydiiso garsooraha inuu go'aan ka gaadho, isaga ama iyadda waxay udejin doontaa qadarka lacagta ee masruufka carruurta si waafaqsan hagitaanada, ilaa in ay jiraan *shuruudo gaar ah* mooyee taas oo u faa;iidaysa ilmaha.

Tusaale ahaan, haddii hal waalid uu ku wareejiyo dakhliga hantidiisa ama teeda sida guriga qoyska ama baabuurka waalidka kale magdhow la'aan, waxay ugu faa'iidayn kartaa ilmaha si toos ah ama si aan toos ahayn. Waalidka waxa uu dooran karaa inuu ka fiirsado shuruudahan gaarka ah marka uu go'aan ka gaadhayo qadarka lacagta masruufka.

**Goorma ayuu masruufka carruurtu dhammaadaa?**

Haddii aad horay uhaysatay amarka maxkamada ee masruufka carruurta ama heshiis qoran, waxay sheegi kartaa marka masruufka carruurta uu dhammaan doono. Tusaale ahaan, amarkaaga taageerada ama heshiiska waxa uu sheegi karaa in taageeradu ay joogsan doonto marka ilmahu uu gaadho da'a gaar ah. Haddii amarkaaga masruufka carruurta ama heshiishka aanay sheegin marka taageeradu dhammaanayso, markaas shuruudaha in la bixiyo masruufka carruurtu way sii socotaa ilaa amarka ay beddesho maxkamaddu ama ilaa adiga ama waalidka kale aad beddeshaan heshiiskiina.

**Ma u siin karaa masruufka carruurta si toos ah ilmahayga halkii aan ka siin lahaa waalidka kale?**

Masruufka carruurta guud ahaan waxaa la siiyaa waalidka kale, maaha ilmaha. Xaalado dhif ah, garsoorayaasha waxay amri karaan in masruufka carruurta la siiyo ilmaha kaas oo ah ama ka wayn da’da qaan gaadhka. Garsoorayaashu waxay ka tixgalin doonaan xaalada qoyska si ay u go’aamiyaan haddii lacag bixinta tooska ah ay habboon tahay.

**Haddii aan u hayo carruur lamaane cusub, weli ma bixinayaa taageerada carruurta ee carruurta ka timid xidhiidh hore?**

Waalidku waa inay sii wadaan taageerida carruurtooda dhaqaale ahaan xataa haddii ay leeyihiin masuuliyada qoys cusub. Amarka jira ee masruufka waxa uu dhaqan gal ahaanayaa ilaa dhammaadka taariikhda lagu dejiyay amarka ama ilaa ay beddesho maxkamaddu.

Si waafaqsan Hagitaanka Federaalka, maxkamadda waxay amri kartaa qadarka masruufka carruurta  kaasoo ka duwan kii hore haddii sheegashada dhibaato dheeraad ah lagu guulaysto. Duruufaha sababi kara dhibaato dheeraadka ah  waxaa kamid ah waajibka loogu taageeraya carruurta  ka timid xidhiidh cusub. Waxaa jira labba tallaabo oo lagu go’aaminayo in waalidka ama ilmaha uu la kulmayo dhibaato dheeraad ah iyo in kale.

- Waa inaad marka ugu horaysa muujisaa in duruufahaagu ay ka dhigi lahaayeen kuwa aad u adag in aad bixiso qadarka loo baahan yahay ee masrufdka ilmaha;

- Heerka nolosha ee labba qoys markaa waa la isbarbardhigayaa si loo arko haddii waalidka waydiisanaya isbeddelka masruufka carruurta uu heerkiisa noloshu ka hooseeyo qoyska waalidka kale.

***Baro waxbadan oo ku saabsan macluumaadka xorta ah ee ku saabsan furriinka iyo kala maqnaanshaha laga heli karo Cadaaladda Canada fiidyowgan gaaban, ama booqo websaydkayaga:***

## ***Canada.ca/family-law***

**Afeef:** Tani ma ahan qoraal sharci ah oo ma bixinayso talo sharci ah. Maadaama sharciga qoysku u adkaan karo, caadi ahayn waxay u fiicantahay shakhsiyaadka inay helaan talo ku saabsan xaaladooda oo ka timid qareenka sharciga qoyska. Qareenadan ayaa ah meesha ugu wanaagsan ee aad ka heli karo talo sharci oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka. Ururada qareenada ee gobolada iyo deegaanka badankooda waxay bixiyaan Adeegyada Gudbinta ee Qareenka. Qareenada qaarkood waxaa laga yaabaa inay bixiyaan la tashi hore oo bilaash ama mid raqiis ah, ama shakhsiyaadka ayaa go’aan ka gaadhi kara inay dhowr jeer la tashadaan qareen si ay uga caawiyaan dhowr dhinac oo kamid ah xaaladooda gaarka ah